



Dugsiyada Cherry Creek

Heshiiska Badbaadada Ardayda Sayniska ee Dugsiyada Sare

UJEEDO

Sayniska waa fasal shaybaar gacan-ku hayn ah. Waxaad samayn doonaa hawlo badan oo shaybaar u baahan isticmaalka kiimikada halista ah. Ammaanka fasalka sayniska waa mudnaanta # 1 ee ardayda, macalimiinta, iyo waalidka. Si loo hubiyo amaanka fasalka sayniska, waxa la soo saaray liiska xeerarka barnaamijka heshiiska amniga ardayda. Xeerarkan waa in la raaco markasta. Laba nuqul oo heshiiskan ah yaa diyaar ah. Mid ka mid ah nuqul waa in ay saxiixaan adiga iyo waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah inta aadan ka qayb qaadan shaybaarkan. nuqulka labaad waa in lagu buuga sayniska si xusuusin joogto ah ay ugu ahaato xeerka nabadgelyada ardayga.

XEERARKA GUUD

1. Mar walba si masuuliyad leh u isticmaal shaybaarka.
2. Si taxadar leh u raac tilmaamaha afka ama qoraalka ah. Haddii aadan fahmin jihada ama qayb ka mid ah nidaamka, weydii macalinka inta aadan horey u sii socon.
3. Ardayna kaligii kama shaqeyn karo shaybaarka iyada oo aan macalin kiisa la joogin.
4. Marka ugu horeysa ee aad gasho qolka sayniska , ha taaban qalab kasta, kiimikada, ama qalabka kale ee yaala shaybaarka ilaa amar lagu siiyo..
5. Ha cunin cuntada, cabin cabbitaanada, ama xanjo ku ruugin gudaha shaybaarka. Ha u isticmaalin galaasyada shaybaarka sida weel cunto ama cabitaan.
6. Ku samee oo kaliya kuwa tijaabooyinka u kuu fasaxo macallin tababare ah. Marna ha samayn wax kasta oo aanu kuu fasixin nidaamka. Ama tababaraha shaybaarka. Si taxaddar leh u raac tilmaamaha oo dhan, xaga qoraalka ama afka. Tijaabooyinka aan la oggoleyn oo dhan waa la mamnuucay
7. U diyaar noqo shaqada gudaha ee shaybaarka. Akhri nidaamka oo dhan si fiican ka hor inta aad galin sheybaarka.
8. Marna ha ku dhex ciyaarin gudaha shaybaarka. Farakaciyaar, kaftanka dheel dheelsha ah waa khatar waana mamnuuc .
9. Waxaad dhawrtaa dhaqanka guri wanaagsan. goobaha shaqadu waa in ay ahaadaan meelo nadiifi ah oo hagaagsan waqti walba. keen tilmaamaha shaybaarka, waraaqaha, iyo / ama warbixino goobta shaqada. qalab kale (buugaag, boorsooyinka, boorsooyinka dhabarka lagu qaato, iwm) waa in lagu kaydiyaa meelo ka mid ah fasalka.
10. Baneer marinka la maro fasalka dhexdiisa. kursiga miiska hoostiisa ku riix .

11. Ogow meelaha ay yaalaan qalabka badbaadada degdegga ah oo ay ku jiraan qalabka gargaarka koowaad, xarunta indhaha lagu dhaqo, meesha lagu qubeysto, dab-bakhtiye, iyo bustaha dabka lagu dado. Ogow meesha ay ku yaalaan digniinta dabka iyo bixitaanka.
12. Had iyo jeer ka shaqee meel hawo wanaagsan. Istimmaal qalabka madaxa la gashto marka aad ka shaqeyneyso meela leh walxaha kacsan sida qiiqa ama uumi sun leh. Marna madaxaag ha galin meel leh qiiq .
13. Digtoonow marwalba si taxadar lehna uga shaqee gudaha shaybaarka. Ogeysii macalinka si degdeg ah wax kasta oo xaalado ammaan darro ah oo aad aragto.
14. tuur qashinka kiimikada oo dhan si sax ah. Marna ha isku daraan kiimikada gudaha saxanka wasakhda saara. Saxanka waa in loo isticmaalo oo kaliya biyo iyo wax yaabaha la isku qaso ee logu talagalay ee macalinku ogolaaday. kiimikada adag, macdanaha, taraqa, warqadaha filtarka, iyo dhammaan qalabka kale ee aan isku qasmin waa in lagu tuura weelka qashinka. Hubi qoraalka ku qoran weelka qashinka laba jeer ka hor inta aanad ku darin qashinkaagga weelka wasaqda .
15. Sumadaha ku qoran qalabka waa in si taxadar leh loo akhriyaa inta aan la isticmaalin ka hor diyaari una isticmal qalabka sida lagu faray ama uu ku tusay macalinkaaga.
16. gacmaha ka dhawr wajiga, indhaha, afka iyo jirka marka aad isticmaalayso kiimikada ama tijaabooyinka daboolan. gacmahaaga saabuun iyo biyo ku dhaq ka dib markii aad tijaabo samaysid. Nadiifi korka shaqada oo dhan marka ay dhamaadaan tijaabooyinka. Ku celi qalabka oo dhan oo shaqeynaya nadiifna ah meeshii loogu talagalay ee kaydinta.
17. Tijaabooyinka waa in si shakhsi ahaan ah loo ilaaliyo wakhti kasta . Waxaa lagu xilsaari doonaa saldhig shaybaar oo aad ku shaqeeysid. Ha ku warwareegin agagaarka qolka, ha ku mashquulin ardayda kale, ama ha faragelin tijaabooyinka shaybaarka kuwa kale.
18. Ardayda marnaba looma ogola qolalka lagu kaydiyo sayniska ama meelaha diyaarinta haddii aanu macalinku fasax gaar ah siinin .
19. Ogow haddii ay jirto tijaabo dab damis xiligga shaybaarka; Weelasha waa in la xiraa, filtarka gaaska la demiyo, naqaska qiiqa la demiyo, iyo wixii qalab koronto ah waa in la demiyo.
20. Daryeel shayada noolaha ah ee lagu isticmaalo shaybaarka si hab biniyaadan nimo leh. qalabka noolaha dhawrsan waa in loola dhaqmo si ixtiraam leh loona tuuro si sax ah.
21. Marka la isticmaalayo mindiyo iyo alaabta kale ee fiiqan, had iyo jeer iska foggee fiinta qoran hoosna u jeedi. Had iyo jeer ka foggee jirkaaga. Marna ha isku dayin in aad qabato qalab fiiqan oo af leh oo meel ka soo dhacay. Ka qabso alaabta fiiqan meesha siddada leh oo kaliya.

22. Haddii aad qabto xaalad caafimaad (tusaale, xasaasiyad, uur, iwm), ka hubi dhaktarkaaga ka hor inta aanad ka shaqeyn shaybaarka.

DHARKA

23. Mar kasta oo la isticmaalo kiimiko, kulaylka, ama galaasyada , ardaydu waxey xiran doonaan ookiyaalaha shaybaarka.sharcigan marna lagama tagi karo waa in lagu dhaqmo!
24. Muraayadaha balaastiga ee indhaha la gashto laguma xiran karo gudaha shaybaarka adiga oon ogolaansho ka haysan macalinkaaga .
25. Si sax ah u labiso inta lagu guda jiro shaybaarka . timo dheer, dahab laadlaada, iyo dhar dabacsan waa u halis gudaha shaybaarka. timaha dheer waa in dib loo xiraa, dahabka laadlaada iyo dharka dabacsan waa in la adkeeyo oo la xajiyo. Kabaha waa in ay gebi ahaanba daboolaan cagta. Kabaha saandalka lama ogola .
26. Waxaa la idin siiyay maro macawis-ama dufan dhowr ah waana in la xirto inta lagu guda jiro hawlaha shaybaarka.

SHILALKA IYO DHAAWACYADA

27. U gudbiWarbixinta shil kasta oo ku saabsan (dilaac,daadasho , iwm) ama dhaawac (goosmo, gubasho, iwm) isla markiiba u gudbi macalinkaaga, xitaa haddii ay u muqato in ay tahay wax aan dhib lahayn.
28. Haddii adiga ama qofka aad shaybaarka ka wada shaqeysaan dhawac idin soo gaaro, isla markiiba qayli oo ku dhawaaq "Code one, Code one" si aad u heshid dareenka macalinka.
29. Haddii kiimikada indhaha kaaga daadato ama jirka, isla markiiba isku rushee biyaha socda ee xarunta indhaha lagu dhaqdo ama meesha qubeyska ugu yaraan 20 daqiiqo. Ogeysii macalinka isla markiiba.
30. Marka heerkulbeegyada mercurigu ay jabaan, mercuriga waa in aan la taaban. Ogeysii macalinka isla markiiba.

DARYEELKA KIIMIKADA

31. Dhammaan kiimikada shaybaarka gudahiisa waa in loo tixgeliyaa in ay tahay khatar . Ha taaban,dhadhamin , ama urin kiimikada ilaa si gaar ah lagugu amro mooyee. Farsamada ku habboon urinta qiiqa kiimikada waa lagu soo bandhigi doonaa.
32. Ka fiiri dhalooyinka calaamada kiimikada laba jeer ka hor inta aadan ka saareen waxyaabaha ay ka koobantahay .Ka qaado kiimikada inta aad uga baahantahay oo kaliya.
33. Waligaa ha ku soo celin kiimikada aan la isticmaalin weelashii hore ee ay ku jireen.



Dugsiyada Cherry Creek

Heshiiska Badbaadada Ardayda Sayniska ee Dugsiyada Sare

34. Marna ha u isticmaalin afka nuugid si aad u buuxiso tuubada mikaraskoobka. Isticmaal caag ama bamka mikaraskoobka.
35. Marka aad ku wareejinayso kiimikada weel kale, ka fagee weelka haamaha jirkaaga.
36. Aashitada waa in loo maareeyaa si taxadar leh. Waxaa lagu tusi doonaa habka ugu habboon ee la isugu qaso aashitada adag. Had iyo jeer ku dar aashitada biyo, qas ama walaaq qooshka ama dareeraha iskana ilaali kulaylka ka soo baxa, gaar ahaan aashitada sulfurika ah.
37. Ku dabool oolka halista ah digsi si aad uga ilaalisoo daadashada. Marna ha ku sii dayn meel furan oo uu ka soo baxo kulaylka.
38. Marna ha ka saarin kiimikada ama maadooyinka kale aagga shaybaarka.
39. Si taxadar leh u ilaali marka aad ka qaadayso aashitada iyo kiimikooyinka kale qayb ka mid ah shaybaarka. Si adag u qabo oo ammaan ah tartiibna u soco.

DARYEELKA Galaasyada iyo Qalabka

40. U qaad tubbada galaaska, gaar ahaan mida dheer, si loo yareeyo in u dhaco dillaac iyo dhaawac.
41. Marna ka ku qaadin gacmahaaga oo banaan-qaawan dhalooyin jajaban . Isticmaal burushka iyo habaas qaadaha si aad u nadiifiso jajabka dhalooyinka. Dhig qashinka ama dhalooyinka jajabay meeshii loogu talagalay ee weelka qashinka .
42. galinta iyo ka saarista tubbada galaaska caaga rabarka waxey keeni kartaa khatar. Had iyo jeer saliidayn ku samee galaasyada (tuubada,- tuubooyinka, heerkulbeegyada, iwm) ka hor inta aanad gelin daboolka. Had iyo jeer gacmahaaga ilaali isticmaal shukumaan ama gacmo gashi suuf ah marka aad galinayso tubbada galaaska ama aad ka saareyso daboolka rabarka. Haddii gabal ka mid ah galaasyada noqdo "Baraf" u gee macallinkaaga si looga saaro.
43. Ku shub dhalooyinka biyaha la safeeyey una isticmaal sidii loogu tala galay oo keliya, tus, galaasyada iyo qalabka, ama biyo ku shub weelka.
44. Marka laga saarayo waayirka godka korontada qabo dhinaca rabarka ah , ha qabsan xarigga korontada. gacmahu waa in ay qaleel ahaadaan inta aadan taaban meesha korontada laga daaro, godka, ama xarigga korontada.
45. Iska fiiri galaasyada inta aan la

isticmaalin mar kasta. Marna ha isticmaalin galaasyada jaban ama dillaacsan. Marna ha isticmaalin galaasyada wasakhaysan.

46. Deg deg u soo sheeg qalabka korontada burbursan. Fiiri xarkaha gubtay, Xarkaha muuqda, kuwa aan si fiican u xirnayn. Ha isticmaalin qalabka korontada ee jajaban.
47. Haddii aanad fahmin sida loo isticmaalo qalabka, weydiiso macalinka gargaar.
48. Ha quusin galaasyada kulul biyo qabow, waxaa laga yaabaa in ay burburaan.

WALXAHA Kululaynta

49. Aad uga taxaddar marka aad isticmaalayso aalada gaaska lagu shido. Timaha, dharka iyo gacmaha marwalba ka fagee holaca. Holaca ha saarin walxaha ilaa lagugu amro. Marna ha laacin holac baxaya sida gaaska fudud (ama khamriga) ila macalinku kuu fasaxo mooyee.
50. Marna ha ka tegin ka lagu shido holaca. Marna ha ka tegin walxaha la kululeeyo ee aan qofna la joogin. Mar kasta dami saxanka kulul marka aan la isticmaalayn.
51. Waxaa lagu bari doonaa habka ugu haboon ee loo kululeeyo iyo kariyo dheecanka gudaha tuubooyinka tijaabada ha ku fiiqin dhinaca furan ee tubada tijaabada naftaada ama qof kasta oo kale.
52. biraha kulul iyo galaasyada aad bay u kululadaan muddo dheer. waa in gaar loo dhigo si loo qabowjiyo si taxadar leh na loo qaado. Isticmaalna birqaabyo ama gacmo gashi kulaylka-difaaca haddii loo baahdo.
53. Marna ha eegin weelka la kululeeyayo.
54. Ha saarin qalab kulul si toos ah miiska shaybaarka. Had iyo jeer isticmaal suufka dahaar saarka ah. ogolow waqti badan in u ku qabowbo qalabka kulul ka hor inta aadan taaban.
55. Marka aad qaloocinayso galaaska, waqti sii u ku qabowbo inta aanad farsameyn. galaasyada qabow iyo kuwa kulul muuqaalka way iskaga egyihiin. Go'aanso haddii shaygu kulul ama qabow yahay oo gacanta saar inta aadan qabsan.

SU'AALAHA:

56. Ma xirataa contact lenses?
HAA MAYA
 57. Ma kala garan karta farqa u dhexeeya midabada?
HAA MAYA
 58. Ma leedahay xasaasiyad?
HAA MAYA
- Hadii ay sidaas tahay, ku qor xasaasiyada gaar ka ah:



Dugsiyada Cherry Creek

Heshiiska Badbaadada Ardayda Sayniska ee Dugsiyada Sare

HESHIISKA

Aniga, _____,

(Magaca ardayga) waan akhriyey waana aqbalay in aan raaco xeerarka nabadgalyada oo dhan ee ku xusan heshiiskan. Waxa aan aaminsanahay in aan adeeca xeerarkan si loo hubiyo ammaankeyga, iyo ardayda iyo macallimiinta . waxaan iskaashi ku saabsan amaanka la sameyn doonaa ardayda iyo macalinka si loo helo shaybaar amaan ah oo sugan. Waxaan kale oo aan raaci doonaa tilmaamaha hadal iyo qoraal ee uu bixiyo macalinka. Waxaan la socdaa in waxii xadgudub ah ee ka yimaada heshiiska ammaanka ee keeni kara amaan daro shaybaarka gudahiisa ama anshax xumo in ay keeni karto in lagaa eryo shaybaarka, xadhig, in aad hesho fasalka buunda hoose ama ku dhacdo, iyo / ama fasalka oo lagaa eryo.

Saxiixa Ardayga IYO Tariikhda

Gacaliye Waalid ama Mas'uul:

Waxaan dareemaynaa in lagugu wargeliyo arin ku saabsan dadaalka uu dugsi ugu jiro in la sameeyo fasal sayniska lagu barto iyo / shaybaark ammaan ah.

Iyadoo iskaashi lala samaynayo macallimiinta, waalidiinta, iyo ardayda, barnaamijka barashada ammaanka, waxa u tirtiri karaa, ka hortagi karaa, suurto galna ka dhigi karaa ka hortaga khataraha.

Waa in aad ogaataa tilmaamaha ammaanka ee wiilkaagu / gabadhaadu ay heli doonaan ka hor inta aysan bilaabin hawlaha shaqo ee shaybaarka . Fadlan akhri liiska kor ku xusan ee xeerarka ammaanka. Ardayna looma ogolaan doono in u qabto hawlaha shaybaarka haddii aan la saxiixin heshiiskan oo ardayga iyo waalidka / mas'uulka oo aan la galin faylka macalinka.

Saxiixa heshiiskan waxa uu mujinayaa in aad akhrisay heshiiska amniga Ardayda, waana ay ka warqabaan talaabooyinka laga qaaday si loo xaqiijiyo ammaanka wiilkaaga / gabadhaada ee shaybaarka sayniska, waxaanad fari doontaa wiilkaaga / gabadhaada in ay ilaaliyaan heshiiskan ayna raacaan xeerarka, sharciyada, iyo nidaamka shaybaarka.

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka IYO Tariikhda